

Waxaad ka heshay xaashidan
macluumaadka bukaanka
dhakhtarkaaga/kalkaalisadaada
caafimaad.



ADIGA OO AH, QOF LOO QORAY DAAWADA INSULIN ASPART SANOFI



 **Insulin**
aspart Sanofi

Buugyarahan waxaanu u qornay kuwiina qaba sonkorta oo uu dhaqtarkoodu u soo qoray Insulin aspart Sanofi. Ujeedada ugu wayn ee dhammaan daaweynta xanuunka sonkorta waa in uu qofku dareemo caafimaad, iyo in sidoo kale lagu guulaysto in la helo heerka suurtagal ahaan ugu caadiga ah ee sonkorta dhiigga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan daaweynta sonkortaada waa inaadan ka caga jiidin inaad su'aasho dhaqtarkaaga ama kalkaaliyahaaga.

Waa maxay sababta aan ugu baahanahay insuliinta wakhtiga cuntada?

Insuliintu waa hoormoon ka caawinaaya jirka nidaaminta / xakamaynta heerarka sonkorta ee dhiigga. Marka insuliinta lagugu mudo, waxay ka caawinaysaa jirkaaga inuu hoos u dhigo heerarka sonkorta ee dhiiggaaga markii insuliinta jirku soosaaro ayna ku fillayn.

Insulin aspart Sanofi waa insuliin si toos ah u hawlgasha wakhtiga cuntada taasi oo matasha saamaynta insuliinta dabiiciga ah ee jirka wakhtiyada cuntada. Insulin aspart Sanofi waxay bilawdaa yaraynta sonkorta dhiigga 10–20 daqiiqo kadib marka lagugu mudo. Saamayntu waxay ugu xoog badan tahay 1–ka ilaa 3-da saacadood ee ugu horreeya kadib mudista waxayna soconaysaa 3–5 saacadood.

Bilaabashada saamaynta dhakhsaha ah ee Insulin aspart Sanofi waxay kuu saamaxaysaa inaad toos u qaadato cuntada kahor ama isla marka cuntada aad dhammaysato. Ma aha inaad wakhti u dhaxaysiiso mudidyada (durisyada) iyo cuntooyinka.

Insulin aspart Sanofi waxay wax ka qabataa sarraynta heerarka sonkorta dhiigga ee yimaadda xilliyada cuntada waxayna dhiigga ka baxdaa dhawr saacadood kadib.

Marka lala qaato insuliinta aan hore dhiigga u galin, Insulin aspart Sanofi waxay ku siisaa fursad aad ugula noolaato si badbaado leh oo raaxo leh xanuunkaaga sonkorta.

Waa maxay waxyeelooyinka iga soo gaari kara daawaynta insuliinta?

Iyadoo ku xiran arrimo kala duwan, waxa dhici karta in insuliintu kugu badan tahay marka loo eego xaddiga sonkorta ee dhiiggaaga ku jirta. Waxa markaa kugu iman doonta sonkorta dhiiga oo intii caadiga ahayd ka yaraata. Tan waxa loo yaqaan u nuglaanta insuliinta.

Astaamaha guud:

- Gariir
- Gaajo dareemid
- Dhidad
- Wadne gariir
- Diirad-saarid liidata
- Khalkhal aragga ah
- Caro/xanaaq badni
- Tamar darro

Waxyaalaha keena u nuglaanta insuliintu waxay noqon karaan:

- Cuntada oo daahda
- Cunto yar cunid
- Insuliin iyo/ama kiniinada sonkorta dhiigga yareeya oo aad u badan
- Jimicsi (ka badan ama ka dheer intii la qiyaasay)
- Khamri

Si aad sare ugu qaaddo sonkorta dhiiggaaga meeshana uga saarto u nuglaanta, waa inaad had iyo jeer wax cunto. Walxaha sida ugu dhakhsaha badan u kordhiya sonkorta dhiiggu waa dextrose, koob juus oo saafi ah ama wax kale oo macaan.

Sonkorta dhiigga oo ah 3.0-4.0 mmol/l lehna astaamo cadcad ayaa waxaa lagu daaweeyaa dextrose (1/2-1 kiniinka dextrose ah 10-kii kg ee culayska jirka ahba). Biyo cab si ay daawadu dhakhso u gasho jirka.

Haddii uu wali ka harsan yahay wakhti wakhtiga cuntada ee xiga, waxaad u baahan kartaa cuwaaf dheeraad ah. Cunida cunto aad u badan micnaheedu ma aha in nuglaantu dhakhso u dhammaanayso. Xeer muhiim ah markii aad qaadanayso daawaynta insuliinta waa inaad had iyo jeer dextrose sidato.

Kahor ku mudista Insulin aspart Sanofi

Ka soo saar dhaladaada cusub ama qalinka hore loo sii buuxshay tallaagadda hal ilaa laba saacadood kahor. Iska hubi in insuliintu saafi tahay (aysan midab lahayn oo ay saafi ka tahay wax adag oo muuqan kara). Haddii insuliintu ay tahay mid daruur daruur ah, waa in aad iska tuurtaa dhalada ama qalinka horey loo sii buuxshay.

Raac tilmaamaha soosaaraha qalinka markii aad ku shubayso qalinkaaga dib loo isticmaali karo Insulin aspart Sanofi, had iyo jeerna isticmaal irbad cusub markii aad muditaan samaynayso.

Cabir guluukoosta dhiiggaaga markii aadan waxba cunin.

Waxa muhiim ah inaad aqoon ku filan u leedahay sonkorta dhiiggaaga marka aadan waxba cunin iyo heerka sonkorta dhiiggaaga qiyaastii laba saac kadib cuntada.

Dhaqtarkaada ama kalkaaliyahaaga ayaa ku siin doona macluumaad iyo talo kusaabsan sida aad kolba u beddelayso xaddiga insuliinta aad qaadanaysid iyadoo ku salaysan heerka sonkorta dhiiggaaga si aad si fudud oo badbaado leh ugu maarayso sonkorta dhiiggaaga. Fadlan isticmaal buugga Xusuusqorka Sonkortaada si aad ula socoto heerarka sonkorta dhiiggaaga iyo qiyaasta aad qaadanayso ee insuliinta.

U kaydi Insulin aspart Sanofi si habboon

Insulin aspart Sanofi ee ku jirta baakada aan la furin waa in lagu kaydiyo tallaagad heerkulkeedu yahay 2-8°C waxaana waajib ah inayna barafobin marnaba. Insuliinta la isticmaalay waxa waajib ah in lagu kaydiyo ugu badnaan 30°C waana in laga fogeeyo qabowga iyo iftiinka qorraxda.

Wixii insuliin soo hara ah waa in la iska tuuro afar toddobaad kadib. Sababtan darteed, fadlan qor taariikhda aad galisay dhalo cusub ama aad bilawday qalinka hore loo sii buuxshay.

Daawooyinka waa inaan lagu qubin biyaha bullaacadda ama qashinka qoyska, laakiin taas baddalkeeda waa in lagu celiyo farmasiga si gacan looga gaysto ilaalinta deegaanka.

Sida loo qaato Insulin aspart Sanofi


Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona qiyaasta aad isticmaalayso iyo halka aad kaga durayso jirkaaga Insulin aspart Sanofi. Insulin aspart Sanofi waa insuliin maqaarka hoostiisa lagu duro (diirka hoostiisa) 0-15 daqiiqo kahor ama muddo yar kadib cuntada ama iyadoo la adeegsanayo bamka ku shubista maqaarka hoostiisa oo joogto ah.

Qiyaasta wakhtiga cuntada ee ay tahay inaad qaadata waxay ku xiran tahay:


- Waxa aad cuni doonto
- Heerka sonkorta dhiiggaaga kahor cuntada
- Waxa aad samayn doonto.

Meelaha aad iskaga durayso

Iyadoo la raacayo talobixino cusub marka la eego isku durista insuliinta, waxa muhiim ah inaad kala duwdo meelaha ku durista iyo sidoo kale in la wareejiyo aaggaga lagu durayo Insulin aspart Sanofi. Ka dooro meelaha soo socda:



Sida qalinka SoloSTAR u shaqeeyo



Diyaari qalinka


1) Hubi inaad haysato daawada saxda ah. Insulin aspart Sanofi SoloSTAR wuxuu ku yimaaddaa qalin cawlan oo leh badhanka durista oo liimi ah.



2) Ka saar furka dhawrista oo hubi in insuliintu tahay mid xareedi ah / la iska dhex arki karo.



3) Ku xir irbad cusub. Wareeji ama taabo irbadda iyadoo ku salaysan irbadda aad isticmaalayso.



Muhiim: Ha diyaarin qiyaasta aad qaadanayso ama cadaadin badhanka durista iyadoo ayna irbaddu ku xirnayn.

Samee tijaabinta badbaadada kahor durniin walba

4) Diyaari laba halbeeg adigoo meesha qiyaasta aad qaadanayso laga doorto u wareejinaya dhinaca bidix. Ka fuji irbadda dahaarada dibadda iyo gudaha.



5) Qalinka hay iyadoo irbadda sare u taagan tahay. Ka saar wixii hawo ah oo ku jirta adigoo farta ku cadaadinaya weelka insuliintu ku jirto.



6) U riix badhanka durniinka ilaa meesha ugu hoosaysa. Hubi in insuliintu ay ka soo baxdo caarada irbadda iyo in daaqadda qiyaasta aad qaadanayso sheegayso "0".

Diyaari qiyaasta oo isku dur


7) Diyaari qiyaasta aad qaadanayso ee aad dooratay. Haddii aad dhaafisay halbeegga ay tahay inaad isku durto, dib ugu soo celi halbeegga saxda ah.



8) Soo qabo maqaarka oo xaji inta durista aad waddo. Gali irbadda maqaarka aad soo qabatay oo ku dur.



9) Ku hay badhanka durista cadaadis isagoo taagan xaaladdiisa cadaadiska ah inta aad 10 ka tirinayso. Kadibna, irbadda ka siib.



10) Ku xir furka irbadda ee dibadda oo ka fur irbadda. Tuur kaanoolaha laguu qoray. Ku xir furka dhawrista qalinkaaga SoloSTAR oo meel ammaan ah dhig.



Muhiim: Had iyo jeer ka saar irbadda kadib durista oo meel dhig qalinka SoloSTAR bilaa irbad. Tani waxay caawinaysaa kahortagga wasakhawga, hawo gelista iyo daadashada insuliinta.

Waxyaalaha aad tixgelinayso

Kahor isticmaalka koowaad

U akhri waraaqda baakada la socota si fiican.

Ku kaydi qalimada cusub ee SoloSTAR tallaagadda, meel mugdi ah oona qabow (2–8°C) iyagoo ku jira baakada.

Ha barafayn.

Kadib isticmaalka koowaad

Ku kaydi qalinka SoloSTAR heerkulka qolka, oo ugu badnaan ah 30°C.

Had iyo jeer ka saar irbadda kadib durista.

Meel dhig qalinka SoloSTAR bilaa irbad. Tani waxay caawinaysaa kahortagga wasakhawga, hawo gelista ama daadashada insuliinta.

Ka ilaali qalinka SoloSTAR iftiinka qorraxda iyo kulaylka.

Meel dhig qalinka SoloSTAR iyadoo furka dhawristu ku xiran yahay.

Isticmaal qalinka SoloSTAR ugu badnaan afar toddobaad kadib isticmaalka koowaad. Si taxaddar leh u qaad qalinka.

Haddii aad u malayso in qalinkaaga ay waxyeelo soo gaartay, ha isku dayin inaad hagaajiso. Isticmaal qalinka SoloSTAR oo cusub.

Ka saar irbadda kahor inta aadan qashinka raacin qalinka SoloSTAR.

Qashinka raaci qalinka SoloSTAR adoo raacaya habraacyada wakhtigan jira.

Haddii aad su'aalo ka qabto SoloSTAR-kaaga, fadlan naga soo wac khadkayaga adeegga 020-52 68 87.

Insulin aspart Sanofi® (insulin aspart), milan la isku duro 100 units/mL. Rx, F, A10AB05.

Tilmaamid: Waxaa insulin aspart Sanofi loogu talagalay in lagu daaweeyo cudurka sonkorta ee dadka waawayn, dhallinyarta iyo carruurta laga bilaabo kuwa sanad jirka ah. **Baakad gareynta:**

Insulin aspart Sanofi SoloStar 5x3 mL, cartridge 5x3 mL. Wixii ah macluumaad dheeraad ah iyo qiimaynta, ka fiiri www.fass.se. **Macluumaadka**

xiriirka: Insulin aspart Sanofi waxa bixiya Sanofi AB, Box 30052, 104 25 Stockholm, Taleefan: 08-634 50 00, www.sanofi.se. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan daawooyinkayaga, fadlan la soo xiriiir: infoavd@sanofi.com. Taariiqda dib u firiintii ugu danbaysay ee Koobitaanka Astaamaha Badeecada: Ogosto 2020.

▼ Daawadan waxay ku xiran tahay la socod / kormeero la xoojiyey. Wixii ah macluumaad dheeraad ah, ka fiiri www.fass.se.

Su'aalaha ku saabsan badeecadahayaga sonkorta:

020-52 68 87

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan
cudurka sonkorta ayaa laga heli karaa **insulin.se**

Sidoo kale waxaad wax ku saabsan badeecadaha
sonkorta ee kala duwan ka akhriyi kartaa halkan **fass.se**



Sanofi AB, Box 30052, 104 25 Stockholm, tel: +46 8 634 50 00, www.sanofi.se.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan daawooyinkayaga, fadlan la soo xiriir: infoavd@sanofi.com.